



Waxaan dhumiyey ku jiridii kaarkaygii caafimaadka ee MA ama MinnesotaCare Maxaan sameeyaa?

I Lost my MA or MinnesotaCare. What do I do?

Ha dhumin ku jirida Kaarkaaga Caafimaadka

Dhowrkii sanno ee la soo dhaafay, khasab ma ahayn inaad cusboonaysiiso Kaarkaaga Caafimaad ee Dowladda ee [Medical Assistance (MA)] ama MinnesotaCare. Arrintani waxa ay dadka ka ilaalisay inay noqdaan kaar caafimaad la'aan xilligii cudurku uu dillaacay. Laakiin iminka waa inaad u cusboonaysiisaa siddii markii hore! **Haddii aad cusboonaysiiso, ma aha inaad dib-u-codsato.**

Si aadan u noqon kaar caafimaad la'aan:

- 1) **Hubi in akhbaartaada la soo xiriiriddu ay sax tahay si kolkaa aad u hesho ogaysiiska cusboonaysiinta.** Haddii adiga ama qof kale oo qoyskaaga ka mid ahi uu haysto **MA**, wac degmadaada ama qabiilka aad ka tirsan tahay ([county or tribe](#)) si aad u cusboonaysiiso akhbaartaada la soo xiriirida. Haddii aad haysato kaarka **MinnesotaCare**, ka wac hay'adda Gargaarka Macmiladda Daryeeladda Caafimaad (Health Care Consumer Support) khadka 651-297-3862 ama 800-657-3672.

Waxaa jira siddoo kale ka eegid Cusboonaysiinta oo khadka (online) ah ee barta <https://mn.gov/dhs/renewmycoverage/>.

- 2) **Buuxi warqadahaaga cusboonaysiinta markiiba marka aad hesho.** Wax badan arrintan ka ogow adigoo akhrinaya warqadayada xogta aruursan ah ee, *Cusboonaysiinta Kaarkayga Caafimaadka ee [Medical Assistance (MA)] ama MinnesotaCare.*

Hadii aad waydo kaarkaaga caafimaadka ee MA ama MinnesotaCare, waxa aad u baahan tahay inaad dib-u-codsato.

1. Waxa aad dib-u-codsan kartaa kaarka MA ama MinnesotaCare markii aad rabto

Xeerarka xaq u yeeladka kaarka MA ama MinnesotaCare waa ay isbedeli karaan. Haddii heerka dakhligaaggu ama baahidaada caafimaad isbedesho, dib-u-codso xataa haddii horey mar laguugu diiday. Ma jiraan wax xadidaad ah oo ku saabsan inta goor ee aad codsan karto. Haddii aad doonayso inaad dib-u-codsato:

- gal shabarakadda (website) [MNSure](#)

AMA



4. Kaarka Medicare ma leeyahay ganaax ah ka soo daaha isqoridda?

Haa. Laakiin haddii aadan is-qorin kaarka Medicare kolkii aad markii ugu horeeysay xaq u yeelatay, waxa aad haystaa waqti kooban oo aad isku qorto adigoo bixinayn ganaaxa ka soo daahida isqorida. Tan waxaa la yiraa “Mudadda Isqorida ee Gaarka ah.” Mudadaadda Isqorida ee gaarka ahi waxa ay bilaabantaa maalinta aad hesho ogaysiiska ah in kaarkii MA ama MinnesotaCare uu kaa istaagayo. Mudaddan Isqorida gaarka ah waxa ay socotaa 6 bilood ka dib kolka kaarka MA ama MinnesotaCare uu kaa dhamaado.

Kaarkaaga Medicare waxa uu bilowdaa bil ka dib kolka aad isqorto, ama maalinta uu kaarkaaga MA ama MinnesotaCare kaa dhamaado. Adiga ayaa dooran kii aad rabto.

Wixii akhbaar dheeraad ah ee ku saabsan Mudadda Isqorida ee Gaarka ah iyo sidda la isu qoro, ka eeg shabakadda (webiste) [Medicare](#). Ama wac khadka 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227). Isticmaalayaasha Dhagaha culusi (TTY) ha wacaan: 1-877-486-2048.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.